

Siyaasadda JJIE/JJIF- Isticmaalka Daroogada iyo Daawada jir dhiska/Habdhaqanka Ardayga uu Ku Sameeyo Ciyaaraha Dugsigga

Arday kasta wuxuu leeyahay mudnaan uu ku maro tartanta ciyaareed oo la oggolaaday aan ka ahayn haddii uu yahay mid ku jira hawl anshaxa la xariirta.

Isticmaalka ama haysashada tubaakada (sigaar cabidda, ruugid ama ursasho), isticmaalida ama la haanshaha aalkole, isticmaal aan qaanuun ahayn ama lahaansho oo loo isticmaalo maadooyin dhib gaysta, ama isticmaalka ama la haanshaha aan qaanuuniga ahayn ee lala haado daroogada hurda la'aanta keenta ama caado-kadhigashada daroogooyinka ay ku jiraan kuwa jirka dhisa ee ay isticmaalaan ardayda ciyaartooyda ah waa kuwo la mamnuuci doono wakhti kasta iyo meel kasta inta lagu guda jiro xilliyada ka qaybgalka ciyaaraha.

Siyaasadaha iyo xeerarka kaas oo lagu dabakhaayo dhaqanka ardayga iyo aadaabta sidoo kale waxaa lagu dabakhayaa barnaamijka ciyaaraha. Intaasi waxaa siidheer, dhammaan dadka ka soo qaybgala waxaa lagu xukumi doonaa *Dustuurka Dugsiyada Dadweynaha Denver ee Ururka Ciyaarta, Qaanuunka iyo Qawaaniinta Shaqeyaya*.

Ku xadgudubka lagu xadgudbo heerarka dhaqamada kor lagu soo sheegay waxay natiijadu noqon doontaa ciqaabid u kala baxda ka soo qaybgal la'aanta dhacdooyinka ciyaaraha qaarkood si loo mamnuuco ka soo qaybgalka ciyaarta. Ciyaartooygu wuxuu ahaanayaa mid aan u-qalmin inta lagu guda jiro muda kasta oo banaanka ka ah-dugsi joojintiisa mana ka soo qaybgali doono tababarka ama jadwalka tartamada illaa uu dib ugu soo laabto ka soo qaybgalka fasalada.

Tababarayaalka waxay haysan karaa qawaaniin tababar dheeri ah kaas oo haddii la jebiyo oo la fulin waayo la xanbaarayo ciqaab joojin ah oo qofka laga joojiyo kooxda.

Muhiimada ay leedahay in ardaygu uu leeyahay heerka sare oo dhaqan ah ee uu ku leeyahay barnaamijka ciyaarta, kahor inta aan la dul saarin wax ciqaab ah ardayga ciyaartooyda ah, maareeyaha ayaa ka xaddidaya maamulaha dugsigga xagiisa dib-u-eegida daliilka kadibna go'aan ka gaaraya in ardayga ciyaartooyda ahi uu dhab ahaantii ku xadgudbay qaanuunka ururka ciyaartooyda iyo in kale.

Dhammaan ciqaabtu waxay ahaan doontaa mid ugu dambays ah una hoggaansamayo ciyaartooyga iyo xubnaha ka mid ah shaqaalaha tababarka.

Nidaam hawleed codsasho ah ayaa la bixin doonaa oo uu bixinayo ururka ciyaartooyda si loo ilaaliyo xuquuqda ardayda, waalidiinta iyo qaybaha kale ee arrinta danaysa.

La ansixiyay 20 Agoosto, 1976

Loo muraajaceeyay si loo waafijiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JIC, Dhaqanka ardayga, iyo lambarada sirta ah

JK, Anshaxa Ardayga, iyo lambarada sirta ah

La dhaqan geliyay Agoosto 20. 1976

La baddalay si uu u waafaqo caadada: taariikhda la dhaqan geliyay buugga

TIXRAACYADA ISDHAAFSAN: JIC, Dabeecadda Ardayga, iyo koodyada hoose

JK, Dishibiliinka Ardayga, iyo koodyada hoose